# KHIYAANNADA MAAL GASHIGA



## ARAG DIGNIIINAHA TALAABO QAAD!



**Maxay dhibaneyaasha tuugada maalgashigugu ka siman yihiin?**

**Waxay aamineen in fursada maalgashigu ahayd mid sax ah mana aysan arkin ciladaha digniinta lahaa.**

**Buug tusmeedkaan wuxuu sharxayaa astaamaha lagu garto tuugada wuxuuna bixinayaa talaabooyinka la qaadi karo si aad naftaada u difaacdo.**

## MAXAA KA DHIGA MAALGASHI MID SAX AH?

Waxa ay ka siman yihiin maalgashiyada xalaasha ah waa in dadka maalgashiga bixiya iyo shaqsiyaadka iibiya ay ku shaqeeyaan si waafaqsan sharciga. SEC iyo goballada ayaa maamula maalgashiyo badan si loo difaaco maalgashadeyaasha, ayna ku jirto in qasab laga dhigo in shirkaduhu ay diiwaan gashan yihiin iyo in dadka iibiyaana ay diiwaan gashan yihiin ayna ruqsad haystaan. Dadka maalgelinta bixiya waa inay keenaan xog ku filan oo kuu sahlaysa inaad gaarto go'aan faahfaahsan oo ku saabsan inaad maalgashato iyo inkale.

> Ilaa xad intee dhan ayay tuugadu baahday? Sida ay sheegtay FTC, maal-gashadeyaasha ayaa soo sheegay inay ku khasaareen in ka badan $3.8 bilyan falalka khiyaannada ah sanadkii 2022.

Mararka qaar, maalgashi ayaa u qalmi kara in laga dhaafo diiwaan gelinta. Xaqiiji inaad hubiso si aad u xaqiijiso in shardi dhaafka lagu dabaqo midkood adoo adeegsanaaya kaydka xogta EDGAR ee SEC ama adoo ka eegaaya maamuleyaasha amaanka ee goalkaaga.

### *TALAABO QAAD:* HUBI DIIWAAN GELINTA

1. Xaqiiji in qofka maalgashiga bixinaaya uu ka diiwaan gashan yahay SEC ama maamulka gobalkaaga.
2. Xaqiiji in qofka iibiyaha ah uu ka diiwaan gashan yahay uuna ruqsad ka haysto BrokerCheck.org.
3. Haddii aan maalgashigu diiwaan gashanayn, xaqiiji inay u qalanto shardi dhaaf.

## NOOCYADA MAALGASHIYADA XALAASHA AH

### MAALGASHIYADA BULSHADA CAANKA KA AH

Maalgashiyada dhaqan ahaan bulhada dhexdaada caanka ka ah waxaa ku jira suuqyada sicirka, daymanka, hagbadaha, ganacsiyada sarifka, iyo dookhyada iyo maalgashiyada oonlaynka ah.

Ka maalgashade ahaan, waa inaad iska ilaaliso in haddii suuqyada maalgashiyadu ay si guud u qiimo dhacaan, maadaama ay sidaas ku dhacdo mararka qaar, qaar badan haddii aysan ahayn intooda badan kamid ah maalgashiyada suuqyadaas ayaa lumiyo hantida sidoo kale. Inkastoo suuqyada sicirka ee shirkadaha caanka ah ay qiimo ahaan hoos u dhici karaan, maalgashiyada noocaan ah ayaa leh faa'iidada isbadbadalka. Inaad caadiyan iibin karto maalgashigaaga marka aad doonto.

### SHARDI DHAAFYADA DIIWAAN GELINTA

Qaar kamid ah hantida maalgashiga ayaa lagu iibin karaa sifo sharci ah ganacsiyada gaarka ah, kuwaasoo aan u baahnayn diiwaan gelinta SEC.

Maal-gashiyadaan ayaa badanaa la iibiyaa si kor loogu qaado dhaqaalaha ganacsiga. Tusaaleyaasha waxaa ku jira qaar kamid ah maalgashiyada kale, kaydadka gaarka loo leeyahay, saamiga ganacsiyada cusub, iskaashiyada kooban, iyo dhismaha guryaha. Guud ahaan, noocyadaan maalgashiyada ayaa ah kuwo xadidan, taasoo ka dhigan in aadan awoodi doonin inaad si fudud u iibiso saamigaaga, haddiiba aad iibin kartaba. Sidoo kale waxay kugu keenin karaan khatar ka balaaran maalgashiyada caadiga ah waxayna kaa dooni karaan inaad haysato hanti cayiman ama dakhli sanadle ah si aad u maalgashato.

Kahor inta aadan maalgashan maalgashiyada ganacsiga aan caanka ahayn, xaqiiji inaad baarto shirkada iyo qofka adeegga iibinaaya, aad fahanto heshiiska adeegga maalgashiga, ogaato in lacagtaada ay xanibnaan karto muddo dheer, aadna awoodo inaad lumiso lacagta aad maalgashanayso.



> **XEELADAHA ISKU DHAFAN**
> Ha maal gashan sabab la xiriirta inaad ka baqayso inaad lumiso fursada maalgashigii ugu danbeeyay , xataa haddii badeecada uu iibinaayo dalaal diiwaan gashan uuna sameeyo xayiisiin aad u badan. Tusaale, haddii aadan fahmin sida ay u shaqeeyaan IRAs, dookhyada iibka, ama ETFs aad adigu maamulayso u shaqeeyaan, markaas ha isku gelin.

> **KOONTO U GAAR AH MAALGASHIYADA KHATARTOODU AAD U SAREYSO**
> Haddii aad dooneyso inaad tijaabiso qaar kamid ah maalgashiyada khatarta badan, ee isbadbadelka badan, waa inaad keliya adeegsataa cadad lacageed oo yar oo aad awoodo inaad khasaarto. Waxaad furan kartaa koonto gaar ah oo aad ku shubato maalgashiyada aan sharciyada ku dhisnayn sida kiribtada, taasoo luminta dhammaan maalgashigaagu ay suuragal tahay. Haddii aad doorato inaad furato koonto yar oo gaar ah, haka qarin xaaskaaga ama la taliyahaaga dhaqaalaha. Xiliga canshuur bixinta, waxaad u baahan tahay inaad soo sheegto dakhliga kaasoo gala dhammaan koontooyinkaaga.

## NOOCYADA MAALGASHIYADA KHIYAANNADA AH

Maalgashiyada khiyaannada ah ayaa caadiyan sameeya isla balanqaadyada iyo damaanadaha ay sameeyaan tuugadii hore, inkastoo faahfaahinta ku saabsan maalgashiyada ama noocyada ganacsiga ay isbadeli karaan si ay ula socdaan wararka iyo dhacdooyinka markaas taagan.

Maalgashi ayaa noqon kara mid khiyaano ah sababo dhawr ah awgood, ayna ku jiraan:

- Been abuurka waxa ganacsigu yahay, cida ay yihiin mulkiileyaashu, iyo khataraha ay abuurto
- Si khaldan u isticmaalka lacagaha maalgashiga arimo shaqsi ah, qarashaadka ganacsiga oo sharci daro ah
- Shirkado aan jirin, haysta lacago laga qaaday maalgashadeyaasha cusub loona adeegsaday bixinta saamiyada maalgashadeyaashii hore
- Sheegashooyin been abuur ah oo ah in shirkadu leedahay hanti qiimo badan iyo agabka mulkiyada

## ISKA EEG DIGINIINAHAAN LA XIRIIRA KHIYAANNADA MAALGASHIGA

Aqoonsiga digniinaha khiyaannada maalgashiga ayaa muhiim u ah ka difaaca naftaada inaad saami ku yeelato maalgashi khiyaano ah. Mid kasta oo kamid ah digniinahaan ayaa kuu sheegaaya in wax khaldan yihiin. Iskudarka digniinahaan ayaa kuu ku siinaaya digniin ah inaadan waxba ku darsan maalgashigaas.

**Balanqaadka Faa'iido aad u badan**
Balanqaadka faa'iido aad uga badan heerka celceliska oo bilaa khatar waa balanqaad aan la damaanad qaadi karin. Qof kasta—ama xayiisiin kasta—oo balanqaadkaan bixisa waa in si degdeg ah looga feejignaado.

**Sheegashada Faa'iido Joogto ah oo Sanado Badan iska Soconaysa**
Waa inaad iska ilaalisaa haddii shirkad ay kuu sheegto in maalgashigu uu samaynaayo isla faa'iidada muddo sanado badan ah, xataa haddii faa'iidada lasoo sheegay ay u muuqato mid macquul ah ama aad u badan. Mid kamid ah khiyaanooyinka ugu waawayn ee dhanka dhaqaalaha, oo uu maamuli jiray Bernie Madoff, ayaa soo sheegay faa'iidooyin joogto ah sanad kasta, xataa markii suuqa sicirku uu dhacay oo dhaqaaluhu burburay.

### Cadaadis lagugu Saaraayo Inaad Talaabo Degdega ah qaado
In laguu sheego inaad talaabo degdeg ah qaado si aad uga faa'iideysato fursada maalgashiga ama haddii kale maalgashiga keliya la heli karo haddii aad si degdeg ah u maalgashato ayaa ah calaamadaha khiyaannada. Haddii lagu saaro cadaadiskaan inta lagu jiro wicitaan, iimeel, ama baraha bulshada, jar wada hadalka.

> **HEERKA FAA'IIDADA**
> Celceliska sanadkii ee faa'iidada suuqa sicirka Mareykanka muddo 20 sano ah oo ku dhamaanaysa 2023 wuxuu ahaa 9.752% sida lagu cabiray Cabirka S&P 500 ee suuqyada sicirka shirkadaha waawayn. Muddo 30 sano ah oo ku dhamaanaysa Diseembar 2022 wuxuu ahaa 9.64%. Kuwaasi waa cabiro wanaagsan oo aad ku cabiri karto faa'iidada laguu balan-qaaday.

### Ku Adkaysiga Aamusnaanta ama Sirta
Codsiyada ama digniinaha ah in fursada maalgashiga la qariyo ayaa ah calaamad khiyaano. Sheegashooyinka ah in xogta aan lagu siin karin sabab la xiriirta in maalgashigu yahay mid gaar loo leeyahay ayaa ah khiyaano. Waxaa kasii shaki badan in laguu sheego inaadan la xiriirin qareen ama wakaalada gobalka ama federaalka, ayadoo laguugu sababaynaayo in haddii aad la xiriirto ay fursadu lumayso.

### Inaysan Lahayn meel Laga Waco
Iska ilaali dadka iib gaynta ee diidaaya xogta buuxda ee laga wacaayo ayaga iyo shirkada. Sheegashooyinka ah in shirkadu aysan lahayn xafiis loogu hagaago, ama in qof kasta uu guriga ku shaqeeyo, ama in jeegaga ama boostada loo diro P.P. box ayaa ah calaamadaha khiyaannada.

### Khaladaadka iyo Iskhilaafka Dukumiintiyada Adeegga
Dukumiintiyada adeegyada ayaa lahaan kara ciwaanno kaladuwan: Qandaraaska Maalgashiga; Ogeysiiska Balan-qaadka; Heshiiska Maalgashiga Gaarka ah; Heshiiska Maalgashiga; iyo kuwo kale. Ayadoo aan loo eegayn ciwaanka, haddii dukumiintiyada ay ku jiraan khaladaad dhanka hinkaada ah ama la adeegsaday naxwe liita, iska ilaali. Kaladuwaanshiyaasha ayaa ayaguna ah astaan khiyaano. Tuusaale ahaan: "Shirkada ABC, LLC" ayaa lagu adeegsaday ciwaanka, laakiin qaybaha danbe ee dukumiintiga, waxay dhahaysaa "ABC Co" ama "Shirkada ABC".

### Sheegashooyinka Shardi Dhaafka
Haddii xayiisiiye sheegto in shirkada laga dhaafay shuruudaha diiwaan gelinta , shuruudaha diiwaanka dawlada, ama shardi kale oo ruqsadeed ama sharci, xaqiiji inaad iska baarto.

### Taariikhda Dhibaatooyinka
Taariikhda bixiyaha ama qofka iib geeyaha ah ee dalaafida, dacwadaha, daymanka, talaabooyinka sharci fulinta iyo xukunnada horay ugu dhacay ayaa ah astaan xun. Haddii aad baarto aadna ogaato in mulkiileyaasha, maamuleyaasha, ama dadka iib-geeyaasha u ah shirkada taariikh xun leeyihiin, iska ilaali maalgashigooda.

### Marqaati kac
Shirkad ku tiirsan marqaati kacyada shaqsiyaad sheeganaaya inay faa'iido badan ka heleen ayagoo aan shaqo badan gelin ayaa ah digniin aad u wayn. Iska ilaali dadka marqaati kaca samaynaaya ee aad ku aragto muuqaallada ama aad ka maqasho shirarka iyo kulannada maalgashiga lagu sameeyo.



### Codsiyada Lacag Dheeri ah
Khiyaannada ayaa ku bilaaban karta codsiga maalgashi yar. Hadhoow, maalgashadaha ayaa helaaya waraaq ama xog cusub oo ku saabsan maalgashiga ayadoo looga codsanaayo lacag dheeri ah, ayadoo sheeganaysa midkood in maalgashigu hormar sameeyay lana joogo xiligii uu gelin lahaa lacag dheeri ah, ama sheegaysa in shirkadu ku jirto ciriiri dhaqaale ayna u baahan tahay lacag dheeri ah si ay u sii shaqeyso. Ha gelin lacag dheeri ah maalgashi fashilmaaya.

## WAXYAABAHA KA QARSOON DIGNIINAHA MUUQDA: TALAABO QAAD OO BAAR

Kahor inta aadan iskudayin inaad samayso wax maalgashi ah waa inaad raadisaa jawaabo la xiriira shantaan su'aalood.



**1. Qofka bixinaaya adeegyada maalgashigu ma diiwaan gashan yahay?**
Waxaad ka eegi kartaa diiwaan gelinta iyo taariikha xirfadeed ee ee dalaalka iyo qofka iib geeyaha ah, oo ay ku jirana dhibaatooyinku, BrokerCheck.org.

Haddii aadan diiwaan ku arag midkoodna goobahaan, ama haddii diiwaanku muujinaayo taariikhda ficillada xunxun, ha inkirin khiyaannada kuu muuqata.

**2. Shirkada maalgashigu ma ka diiwaan gashan yahay SEC ama ma la siiyay shardi dhaaf?**
Waydii SEC ama maamulaha maalgashiyada gobalka in shirkadu ay haysato dhammaan dukumiintiyada shardi dhaafka ah oo dhab ahaantii laga cafiyay diiwaan gelinta. Waxaad ka eegi kartaa shirkadaha diiwaan gashan kaydka xogta ee EDGAR ee SEC iyo inaad samayso cilmi baaris oonlayn ah.

**3. Ma jiraan dukumiintiga adeegga oo qeexaaya maalgashiga?**
Shirkado badan oo maalgashi bixiya ayaa laga doonayaa inay keenaan buuga adeegyada ama heshiiska maalgashiga gaarka ah (PPM) kaasoo sharxaaya faahfaahinta muhiimka ah ee ku saabsan bixinta adeegyada.

Dukumiintiyada adeegga waa inay qeexaan ganacsiga shirkada, magacyada iyo khibrada iskaashatada iyo fuliyaasha, khataraha ganacsiga, iyo daymanka jiri kara.

**4. Qofka iibiyaha ah ma ka duwan yahay waxa ku qoran dukumiintiyada?**
Waa inaad fiiro gaar ah u yeelataa ilaa xad intee dhan ayay qeexan yihiin khataraha uu dukumiintiga adeegga ama PPM qeexaayo, waa maxay qarashaadku, mase la bixi kartaa saamigaaga.

Qofka iibiyaha ah ma iska indho tirayaa qaar kamid ah walaacyadaada ama ma sheegayaa in faahfaahinta ku qoran dukumiintiga ay ugu jiraan sabab la xiriirta in "qareennadu nagu qasbeen inaan gelino," taasi waa calaamad muujinaysa dhibaato wayn.

**5.** **Ma haysataa nuqullada dhammaan dukumiintiyada?**
Marka aad furato koontada maalgashiga, waa in laguu soo diraa nuqullada dhammaan dukumiintiyada aad buuxisay. Waa inaad sidoo kale arki kartaa dhaqdhaqaaqa maalgashiga ee joogtada ah oo muujinaaya lacagta aad maalgashatay iyo qiimaha hadda ee koontadaada.

Bayaanku waa inuu sidoo kale muujyaa lacagaha joornaatada ah, qarashaadka iibabka, iyo qarashaadka kale. Marka aad dib u eegis ku samayso maal gashiyada raadi ciladaha ayna ku jiraan ganacsiyada sharci darada ah ama lacagaha maqan.

## NOOCYADA IYO TUSAALEYAASHA KHIYAANNADA MAALGASHIGA

Tuugada maalgashiga ayaa mararka qaar raaca hanaan caan ah oo jiray muddo dheer. Kuwo kale si joogto ah ayay isku badbadala, ayagoo ku saleynaaya badeecooyinka cusub ee maalgashiga iyo tignooloojiyadaha cusub ee maalgashiga.

**Qaar kamid ah noocyada ugu waawayn ee khiyaannada ee sii wada inay soo jiitaan dhibaneyaasha waxaa ku jira:**

**Mashruucyada Balanqaadka leh**
Tuugo badan ayaa adeegsada shaacinta balan-qaadka. Inkastoo qoraallada balan qaadka ah ay sax yihiin ganacsiyada xalaasha ah, iska ilaali maalgashiyada adeegsanaaya qoraallada balanqaadka ah, gaar ahaana kuwa balan qaada faa'iidada badan, oo cayiman ama damaanada leh. Ha aaminin sheegashada ah inaan qoraalka balan qaadka gayn karto maxkamada si aad lacagtaada u soo ceshato. Haddii khiyaanooluhu isticmaalo dhammaan lacagta maalgashiga uuna dalaafo, ama kaba sii daran, uu dhuunto, uma badna inaad lacagtaadii soo ceshanayso.

**Mashruucyada Sasabashada ah**
Mashruuca noocaan ah, khiyaanoo,eyaasha ayaa ka faa'iideysta maalgashadeyaasha ayagoo u balan qaadaaya faa'iido badan. Dhibaneyaasha ayaa heli kara warbixinnada joogtada aha ee maalgashiga oo ka yimaada tuugga kuwaasoo muujinaaya sida lacagta akoonkoodu u kordhayso. Waxay sidoo kale awoodaan inay lacagta kala baxaan koontooyinkooda. Laakiin lacagta sahlaysa inay lacagta kala baxaan koontooyinkaas waa lacagta ay maal gashadeen dhibaneyaasha wareegga labaad. Ugu danbayn mashruuca ayaa burburaaya.

**Khiyaannada Magac-saarka**
Khiyaannada noocaan ah ayaa dhacda marka khiyaanooluhu uu adeegsado ganac-saarka koox gaar ah, sida shirkad bulsho, koox taageero, deeq, ama guri cibaado, si uu ugu adeegsado inuu ku helo kalsoonida maalgashadeyaasha si ay u iibsadaan maalgashiga khiyaannada ah. Badanaa, qayb kamid ah balanqaadka ayaa ah in maal-gashigu uu yahay fursad gaar ah oo oo loo fidinaayo keliya xubnaha kooxda.

**Mashruucyada Qarashka Hormariska ah**
Khiyaanooleyaasha adeegsada khiyaannada noocaan ah ayaa ku daga dhibaneyaashoda inay saami lacageed ku darsadaan ayagoo ka doonaaya inay lacag hormaris ah sameeyaan kahor inta aysan helin maalgashiga suuqa sicirka ee ay doonayaan inay iibsadaan. Qarashka, oo loogu yeeri karo ujro ama lacag damaanad ah, ayaan marna lasoo celin, lamana baxsho maalgashi.

**Siminaarada Qadada ama Cashada Bilaashka ah**
Inkastoo siminaaro badan oo dhaqaale oo baxsha cunto bilaash ah ay sameeyaan shirkado sharci ah, qaar kamid ah waxaa sameeya shaqsiyaad aan rusaq sax ah haysan doonaayana inay kugu wargeliyaan inaad maalgashato ayaga ayagoo ku siinaaya cunto bilaash ah. Iib-geeyaha ayaa soo bandhigi kara shahaadooyin ama cadeymo si uu u muujiyo inuu sharci yahay. Xaqiiji inaad xaqiijiso diiwaan gelinta adoo galaaya BrokerCheck.org markastana waad cuni kartaa cuntada waadna iskaga dhaqaaqi kartaa cadaadiska ah inaad kulan danbe oo fool-ka fool ah la yeelato.

**Qaar kamid ah noocyada maalgashiga khiyaannada ah oo waayadaan soo batay waxaa kamid ah:**

**Webseedyada Feega ah**
Ayagoo adeegsanaaya webseedyada taleefanka, tuugada iibgeeyaasha ah ayaa wax ka badeli kara faa'iidooyinka si ay uga dhigaan in maalgashaduhu lacag badan faa'iidaayo. Maalgashadeyaasha ayay ku dhiirinayaan inay lacag dheeri ah gashtaan ayagoo ku saleynaaya fikirka ah in ay lacag badan ku helayaan. Mararka qaar, maalgashadeyaasha ayaa xataa lagu dhiiri gelinayaa inay lacago yaryar la baxaan si ay u muujiyaan dareen ah inay lacagtooda la bixi karaan. Ugu danayntii, marka laga uruursado lacagta ilaa dedaalku miro dhalo, tuugada ayaa xiraysa webseedka.

**Badelida Baraha**
Asagoo maalgashadeyaasha kula xiriiraaya baraha bulshada, tuuga ayaa sheegaaya fursad maalgashi, kadibna ku soo diraaya sarifka maal gashiga ama barta been abuurka ah. Mararka qaar, yabooh ayaa lagu sameeyaa bar sharci ah, laakiin tilmaamaha bixinta ayaa loo adeegsadaa bar kale, oo tuugo ah.

**Marqaati Kacyada iyo Taageerida**
Adeegyada maalgashiga ee aadka ugu tiirsan marqaati kacyada ka yimaada dadka caanka ah ama dadka saamaynta leh ayaa laga yaabaa inay lacag ku baxsheen taageeradaas, ama ay siiyeen dakhli maalgelin shaqsiyaadkaan. Marka maal-gashadeyaasha rasmiga ah ay maalgeliyaan, shirkada ayaan bixinayn faa'iido.

**Lacag Beerista**
Khiyaanada noocaan ah ee lacagaha kiribtada, maalgashadeyaasha ayaa loo balan qaadaa faa'iidooyin boqolkiiba ah oo ay ku helayaan ganacsiga kiribtada haddii ay ku darsadaan qayb kamid ah lacagtooda kiribtada ab sahlaaya inay lacago kala baxaan mustaqbalka. Khiyaanoolaha ayaa la xiriiraaya dhibaneyaasha asagoo adeegsanaaya ilaha kaladuwan ee oonlaynka ah, ayna ku jiraan ababka shukaansiga, wuxuuna wadayaa hawsha muddo si uu u dhiso kalsooni. Kadibna, marka hantida dhibaneyaashu kusoo wareegto, tuuga ayaa u wareejinaaya hantidaas kiishad oonlayn ah kadibna wuu dhuuntaa.

**Maalgashiyada Noocyada kale ah**
Maalgashiyo badel u ah maalgashiyada dhaqanka, sida suuqyada sicirka, ayaa ku haboon maalgashadeyaasha qaar ee awooda khatarha iyo luminta qaar kamid ah lacagtooda maalgashiga. Hase yeeshee, qaar kamid ah maalgashiyada kale ayaa ah khiyaano waayo ma jirto badeeco, ama wakiilada iibka ayaa xog khaldan ka baxsha badeecada. Iska ilaali maalgashiga hantiyada sida guryaha, qalabka kirada ah, waajibaadka daynta, farshaxanka iyo agabka qiimaha leh, iyo NFT-yada, adoo xaqiijinaaya inaad fahanto sida maalgashigu u shaqeeyo. Waa inaad sidoo kale xaqiijiyaa in hantidu ay jirto si sax ahna loo qiimeeyay, inkastoo ay adkaan karto inaad sidaas samayso.

Hubi diiwaan gelinta qofka:
**BrokerCheck.org**

Hubi diiwaan gelinta Shirkada iyo Dukumiintiyada:
**SEC.gov**

Aqoonsiga digniinaha iyo mashruucyada ku qoran buug tusmeedkaan ayaa kaa caawinaaya inay kaa difaacaan inaad dhibane u noqoto khiyaannada maalgashiga. Markasta baar kahor inta aadan maalgashan, oo si joogto ah ula xiriir maamulaha maalgashiyada gobalkaaga haddii aad aaminsan tahay in laguu yaboohay ama lagaa iibiyay maalgashi tuugo ah.

**Washington Department of Financial Institutions**

P.O. Box 41200
Olympia, WA 98504-1200
877-746-4334
dfi@dfi.wa.gov

LIGHTBULB PRESS®

Copyright© 2023 Lightbulb Press. Dhammaan xaquuquhu waa dhawrsan yihiin.
www.lightbulbpress.com
*Xogta Khiyaannada Maal-gashiga* waxaa maal gelisay Haayada Difaaca Maalgashadaha.